# JAMHUURIYADDA SOMALILAND
# XEERKA LA-DAGAALANKA BUDHCAD BADEEDDA
# (PIRACY LAW)
# XEER NO – 52/2012

**Golaha Wakiiladu:**

**Markuu arkay:** Qodobka 2aad, 26aad, 28aad, 39aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliland.

**Markuu arkay:** Soo gudbintii Dikreetada Madaxweynaha ee sumadeedu ahayd JSL/M/SHGW/081/2-936/022012 kuna taariikheysnayd 16/02/2012 oo ujeedadeedu ahayd soo gudbinta Xeerka La-dagaalanka Budhcad Badeedda.

**Markuu Xaqiijiyay:** In ay lagama maarmaan tahay in la abuuro Xeerka La-Dagaalanka Budhcad Badeedda si looga hortago, loo cidhib tiro, loona ciqaabo cid kasta oo ay ku caddaato fal budhcad badeednimo;

**Markuu Tixgaliyey:** dhibaatada baahsan ee ay budhcad badeeddu ku hayso weelasha (vessels) badda ee maraya biyaha Soomaaliland iyo kuwa caalamiga ahba.

**Markuu Ku Qancay:** Baahida loo qabo Xeerka La-Dagaalanka Budhcad Badeedda.

**Wuxuu Soo Saaray:**

**Xeerka La-Dagaalanka Budhcad Badeedda**

**Qodobka 1aad**
**Magaca Xeerka**

Xeerkan magaciisu wuxuu noqonayaa Xeerka La-Dagaalanka Budhcad Badeedda.

**Qodobka 2aad**
**Qeexitaan**

B. Fal Budhcad- Badeed: waxa loola jeedaa:-

1. Fal kasta oo sharci-daro ah oo lagu geysto weerar, qabsasho (detention) ama burburin (depredation) oo ay ku kacaan shaqaale ama rakaab saaran markab ama diyaarad rayid ah (private ship or private aircraft), ama budhcad badeed hubeysan iyadoo ujeedadu tahay in laga helo faa'iido dhaqaale oo sharci darro ah, iyada oo falkaasi lagula kaco:

    b. markab ama diyaarad ku sugan badweyn; qof ama hanti saaran markabka ama diyaarada;

t. markab ama diyaarad, qof ama hanti saaran markab ama diyaarad ku sugan meel aan hoos iman xuduuda dal kale (outside the jurisdiction of any state);

j. markab ama diyaarad, qof ama hanti saaran markab ama diyaarad ku sugan xuduuda biyaha-badda ee Qaranka Somaliland;

2. Fal kasta oo si badheedh ah lagaga qaybqaato fal loo geysanayo markab ama diyaarad rayid ah iyadoo la ogyahay inuu yahay weerar budhcadnimo.

3. Fal kasta oo dhiiri gelinaya ama fududaynaya, ama gacansiinaya budhcadnimo sida ku cad faqrada (1) iyo (2) ee Qodobkan.

4. Sidoo kale, fal budhcad badeed oo uu gaysto/geysato markab ama diyaarad dagaal ama mid dawladeed oo ay shaqaaluhu kula wareegaan awoodii markabka ama diyaaradda kacdoon dartii; islamarkaana ku kaceen fal budhcad-badeednimo sida ku xusan Qodobka 2aad ee Xeerkan.

T. Markab: markab waxa loola jeedaa weelasha badda ee ay ka midka yihiin markab, doon, saxiimad, laash, huudhi iyo weelasha kale ee badda ee loo adeegsado fal budhcad badeednimo.

**Qodobka 3aad:**
**Ujeedooyinka Xeerka:**

1. Ilaalinta amniga iyo sugida nabad-gelyada badda Soomaaliland;
2. Badbaadinta maraakiibta maraya badda Soomaaliland iyo Baddaha Caalamiga ahba;
3. La-dagaalanka budhcad badeedda, tan biyaha Soomaaliland iyo tan biyaha caalamiga ahba;
4. Ka hortaga abaabulka, maalgelinta, xog-siinta, iyo kaalmeynta cid kasta oo ku hawlan falal budhcad badeednimo;
5. Ka hortaga falalka ay budhcad badeedu ku heyso Ganacsatada Soomaaliland iyo kuwa caalamiga ahba;
6. Baadhidda, maxkamadeynta, iyo xabsi gelinta danbiilayaasha budhcad badeedda marka la soo qabto;

**Qodobka 4aad**
**Ciqaabta Dembiga Budhcad Badeed**

Qof kasta oo ku kaca falal Budhcad badeed ee ku xusan Qodobka 2aad ee Xeerkan waxa lugu ciqaabayaa xadhig gaadhaya 5 sano ilaa 20 sano hadii aanu geysan dil.

**Qodobka 5 aad**
**Awoodda Maxakamadaha Soomaliland (Jurisdiction of Somaliland Courts)**

1. Sidoo kale falka budhcadnimo ee ka dhacay markab ama diyaarad Somaliland leedahay korkeed waxa awood u leh Maxkamadaha Jamhuuriyadda Somaliland haddii aanu

marka falku dhacay ku sugnayn biyaha dal kale ama haddii falkaas Qaanuunka Caalamiga ahi hoos geyn awood dal kale.

2. Iyadoon la raacayn Qodobo xeer kale, maxakamadaha Somaliland ayaa awood u leh qaadista dacwadaha budhcad badeedda, ee lagu galo xuduuda badda ee Somaliland ama meel ka baxsan xuduuda badda Somaliland oo aan hoos iman xuduudaha biyaha ee dal kale marka ay gacanta ku dhigaan Ciidanka Ilaaladda Badda Somaliland, iyadoon loo eegayn jinsiyadda qofka eedaysanaha ah.

**Qodobka 6aad**
**Markab ama Diyaarad Budhcad Badeed**

1- Markab ama diyaarad waxaa loo aqoonsanayaa inuu yahay markab ama diyaarad budhcad badeed haddii dadka gacanta ku haya ay u socdaan inay gaystaan falalka budcadbadeednimo ee ku xusan Qodobka 2aad ee Xeerkan,
2- Sidoo kale markab ama diyaarad loo isticmaalay falalka budhcadnimo ee kor ku xusan ilaa inta ay gacantooda ku jirto kuwii falka gaystay waxa loo aqoonsanayaa inuu yahay markab ama diyaarad budhcad badeed.

**Qodobka 7aad**
**Lahaanshaha ama Luminta Jinsiyada Markab ama Diyaarad**

Markab ama diyaaraddi way sii haysan kartaa jinsiyadeedii, xataa marka ay noqotay markab ama diyaarad budhcad badeed. Hay'sashada ama luminta jinsiyada waxaa xadidaaya Xeerka dalka ay ka diwaangashan yihiin.

**Qodobka 8aad**
**Baadhista iyo Qabashada Weelasha Badda ee Ciidanka Ilaalada Xeebaha**

1. Ciidanka Ilaalada Xeebuhu markay su'gayaan amniga iyo nabadgelyada badda iyo xeebaha waxay lahaanayaan dhammaan awoodaha ciidanka Booliska.
2. Ciidanka Ilaalada Xeebaha Somaliland waxay awood u leeyihiin in ay qabtaan, baadhaana markab ama diyaarad gacanta ugu jira budhcad badeed, ama uga shakiyeen fal budhcad-badeed oo ku sugan xuduuda biyaha badda ee Qaranka Somaliland ama meel ka baxsan xuduuda biyaha-Badda Somaliland oo aan hoos iman xuduud biyoodka-badda ee dal kale. Waxaa kale oo ay awood u leeyihiin inay xidhaan cid kasta oo lagu qabto falkaas ama lagu tuhunsan yahay.
3. Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa ay awood u leeyihiin inay bilaabaan baadhista dacwaddaha la xidhiidha falka budhcad badeedda.

**Qodobka 9aad**
**Xad-Gudubka Masuul ama sarkaalka Markab**

1. Masuulka ama sarkaalka markab ay Soomaaliland leedahay ama ajnabi leeyahay ee ku kaca fal burburin ama dhaaca markab ama doon Somaliland leedahay ama ajanebi leeyahay ama xamuulka amase dadka saaran waxaa lagu ciqaabayaa xadhig 10 ilaa 20 sanno ah, haddii falkaasi yahay fal budhcad badeednimo sida ku qeexan Qodobka 2aad ee Xeerkan.

2. Sarkaalka dawladeed ama sarkaalka u xilsaaran dan guud ee qabta hawl ka dhan ah waajibkiisa oo fududaynaysa fal budhcadnimo ama ka qaybqaata faa'iidada wixii laga helay falkaaas oo uu uga faa'iideysto naftiisa ama cid kale ama aqbala balan qaad waxaa lagu ciqaabayaa xadhig 10 ilaa 25 sanno ah

**Qodobka 10aad**
**Reebanaanta Iibsiga Xadhiga**

Xukunka xabsiga ah ee lagu mutaysto danbiyada ku xusan Xeerkan lama iibsan karo.

**Qodobka 11aad**
**La Wareegid**

Doon, markab iyo diyaarad kasta oo budhcad badeed iyo dhammaan midhaha iyo faa'iidada laga helay natiijada gelitaanka denbiga ku xusan Qodobka 2aad ee Xeerkan waa lala wareegayaa.

**Qodobka 12aad**
**Qodobada Xeerkan**

Qodobadda Xeerkani waxa ay ka mid noqonayaan Xeerka Ciqaabta Guud ee Dalka, Waxana lala akhriyayaa Xeerka Ciqaaabka Guud.

**Qodobka 13aad**
**Tirtirid**

Waxaa la buriyey Qodobka 205; 206 ee Xeerka Badda (Legislative Decree N.1) ee soo baxay 21 February 1959; sidoo kale waxaa la tirtiray qodob kasta ama xeer kasta oo ka hor imanaya Xeerkan.

**Qodobka 14aad**
**Dhaqan Galka Xeerka**

eerkani waxa uu dhaqan-gelayaa marka ay Goleyaasha Xeer-dejintu ansixiyaan Madaxweynuhuna saxeexo.

| | |
|---|---|
| C/risaaq Siciid Ayaanle | C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro) |
| Xog.Guud ee G/Wakiilada | Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL |
| …………………………….. | …………………………………… |

## REPUBLIC OF SOMALILAND
## THE PRESIDENT

REF. JSL/M/XERM/249-988/032012 Date: 21 /3/2012

## XEER MADAXWEYNE Lr: 0212/032012

**Xeerka La-Dagaalanka Budhcad Badeedda**
**(Piracy Law)**
**Xeer Lr. 52/2012**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland;

Markuu Helay: Go'aanka Golaha wakiilada JSL ee ku suntan GW/G/KF-17/555/2012 ee 21/03/2012 ee Go'aanka Ansixinta Xeerka la- dagaalanka Budhcad Badeeda (Piracy Law) Xeer Lr. 52/2012;

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Wuxuu soo saaray

Dhaqan- galka Xeerka Lr 52/2012 ee Xeerka la dagaalanka Budhcad Badeedda (Piracy Law).

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland